



Español (503) 916-3582 | Tiếng Việt (503) 916-3584 | 中文 (503) 916-3585 | Русский (503) 916-3583 | Soomaaliga (503) 916-3586

Soo bandhigida maamulaha cusub ee Madison, Adam Skyles

Julaay 2019

Bulshada Madison ee Qaaliga ahoow,

Waxaan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqo in Adam Skyles uu noqon doono maamulaha cusub ee Dugsiga Sare ee Madison. Adam wuxuu noqon doonaa waji aad taqaanaan intiina badan, asagoo joogay Madison tan iyo 2010, oo ay ku jiraan afartii sano ee ugu dambaysay asagoo ahaa Ku-xigeenka maamulaha, waxaana uu ina siinayaa sii wadida markay Madison ay gasho mudada weyn ee kala guurka.

Adam wuxuu badali doonaa Petra Callin, oo ahaa maamulaha Madison sagaalkii sano ee la soo dhaafay. Waxaan u mahadcelineynaa Petra adeegyadeeda iyo uheelanaanta ardaydeena.

Madison waxay ku dhowdahay in ay laba sano u guurto goobta Dugsiga Sare ee Marshall iyada oo 64-sano jir kambaaka Madison ay ku socoto dhismo kaas oo u noqon doona dhismaha dhamaystiran oo casri ah. Aadan oo aqoon u leh dhaqanka dugsiga iyo jiritaanka ardayga kala duwan, iyo sidoo kale ka qayb qaadashada qorshaynta casriyaynta, ayaa noqon doona mid qiimo badan madaama uu u horseedayo kala-guurka iyada oo loo marayo dib-u-dejinta ku-meel-gaadhka ah isla markaana dib ugu soo laabashada kambaaska cusub waqtiga 2021.

Adam wuxuu ku bilaabay Madison isagoo macalin iyo tababare ah, hoggaamiyay barnaamijka kubadda cagta Senatka oo ah tababaraha guud ilaa 2014, markii uu noqday hormuudka ardayda iyo agaasimaha ciyaaraha. Waxaa loo dallacsiyey inuu noqdo ku xigeenka maamulaha dugsiga 2015.

Waxa uu bixiyaa xirfado kala duwan, oo ay ka mid yihiin go'aan qaadashada xogta la wargaliyay, dhisidda koox iyo hagaajinta manhajka tooska ah. Aadanku waxa uu ku fiican yahay inuu ardayga, shaqaalihiiisa iyo bulshadaba ku soo jiido nidaamyada balaaran ee dugsiga iyo abuurista jawi wanaagsan.

Adam wuxuu ka qaatay Shahaada oo Waxbarasho ah (Bachelor of Education) Jaamacadda Concordia, iyo Master oo ah Hogaaminta Waxbarashada ah (Master of Education Leadership) Jaamacadda Grand Canyon.

Waxaa lagugu martiqaaday inaad kula kulanto Adam maalinta Talaadada, July 30, 6 p.m. maktabadda Dugsiga Dhexe ee Roseway Heights (7334 NE Siskiyou St.). Sidoo kale waxaad heli doontaa fursado aad kula kulmi karto asaga bisha Agoosto.

Fadlan igula soo biir u hambalyeynta Adam noqoshada Maamulaha Skyles.

Joe LaFountaine
Kormeeraha Gobolka



Adam Skyles

Portland Public Schools recognizes the diversity and worth of all individuals and groups and their roles in society. It is the policy of the Portland Public Schools Board of Education that there will be no discrimination or harassment of individuals or groups on the grounds of age, color, creed, disability, marital status, national origin, race, religion, sex or sexual orientation in any educational programs, activities or employment.